

San Diego Public Library

**Soo Bandhigida Maktabada Dadweynaha ee San Diego
Kaararka Maktabadda EXCEL ee Ardayda**

Ogoosto 21, 2023

Waalidka ama masuulka qaaliga ahaaw,
San Diego Unified School District (Degmo Dugsiyeedka Mideysan ee San Diego) waxay bilowday iskaashi cusub oo xiiso leh oo ay la leedahay Maktabadda Dadweynaha ee San Diego si loo xaqiijiyo in dhammaan ardaydu ay helaan agabyada iyo adeegyada lagama maarmaanka u ah guusha waxbarashadooda. Laga bilaabo sannad-dugsiyeedkan, Maktabadda iyo Degmo Dugsiyeedka waxay si toos ah u bilaabi doonaan arday ka diiwaangelinta Kaarka Maktabada Ardayda EXCEL ee Maktabadda Dadweynaha ee San Diego (EXCEL Student Library Card). Marka ardaydu helaan kaarka, waxay u baahan doonaan inay keenaan aqoonsigooda Ardaynimada ee Dugsiga San Diego Unified School iyo kaarkooda EXCEL mid kasta oo ka mid ah 36-ka goobood ee Maktabada Dadweynaha ee San Diego si loogu shaqeysiiyo.

Kaarka EXCEL wuxuu ardayda siin doonaa fursad degdeg ah oo ay ku isticmaalaan kheyraadka maktabadda ee bilaashka ah ee soo socda:

- Buugaag iyo buugaag maqal ah
- Marin u helka macallimiinta ardayda ka caawisa shaqada dugsiga ee onlaynka ah
- Isticmaalka kumbuyuutarka gudaha maktabadda, iyagoo marin u helaya Word iyo internetka
- Isticmaalka internetka ee wargeysyada, wararka, iyo agabyada kale ee dhijitaalka ah


Maktabadu waxay sidoo kale bixisaa meelo wax lagu barto oo lagala shaqeeyo ardayda kale iyo sidoo kale munaasabado iyo waxqabadyo kale oo badan oo bilaash ah si loo kor loogu qaado waxbarashada iyo hal-abuurka. Ma jiraan wax lacag ganaax ah oo ardayga looga qaadayo agabyada uu soo daahiyo keenistooda ama wax ganaax ah oo looga qaadi doono alaabta luntay ama waxyeellowday.

Isagoo isticmaalaya kaarkan, ilmahaaga waxa uu marin u heli karaa noocyo badan oo agabyo maktabadeed ah kuwaas oo loogu talagalay in loogu adeego baahiyaha macluumaadeed ee dadka da'a kasta leh. Maktabadu waxay haysaa agabyo daabacan, maqal iyo muuqaal ah, iyo kuwo elektaroonig ah kuwaas oo waalidiinta qaarkood ay marmar u arkaan wax aan u fiicnayn ama aan ku habboonayn carruurtooda. Maadaama shaqaalaheena aysan kormeerayn xulashooyinka ilmahaaga uu sameeyo, waxaanu kugula talinaynaa inaad ka warqabto agabyada ilmahaaga ka soo qaadanayo maktabadda. Mas'uuliyadda xayiraad saarista mudnaanta wax ka amaahashada maktabada ee ilmaha waxay saaran tahay waalidka ama masuulka ilmaha.

Si loo dammaanad qaado qarsoodiga xogta shakhsiyeed ee shaqsi kasta, sharciga California wuxuu amrayaa qarsoodinimada diiwaangelinta iyo diiwaanada amaahda oo siyaasadaha iyo habraacyada Maktabadda Dadweynaha ee San Diego ayaa fulinaya ujeedadaas. Shaqaalaha maktabadda waxay bixin karaan oo kaliya macluumaadka ku saabsan akoonka marka la siiyo ogolaanshaha kaarka, iyadoon loo eegin da'da qofka kaarka haysta ama xiriirka uu la leeyahay qofka codsiga soo gudbinaya.

Waxaan rajeyneynaa inaan sanado badan u adeegno qoyskaaga anaga oo buuxinayna baahiyaha akhriska iyo macluumaadka ee ilmahaaga. Haddii aadan rabin in ilmahaagu yeesho akoonka maktabadda, sida fudud waxaa waaye inaad ka shaqeysiin kaarka iyo inaad u soo celiso macalinka ilmahaaga. Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah, eeg xaashida macluumaadka ee halkaan ku lifaaqan ama nagu soo booqo khadka www.sandiego.gov/excel

Daacad kuu ah,



Misty Jones

Shaqaalaha Maktabadaha Magaalada

Kaarka Maktabada EXCEL ee Ardayda

Xaashida Macluumaadka

Iyada oo loo marayo iskaashi lala yeeshay Maktabadda Dadweynaha ee San Diego (SDPL), San Diego Unified School District (SDUSD) waxay fursad xiiso leh siinaysaa ardayda haysta Kaarka Maktabada EXCEL ee Ardayda, oo ah hab cusub oo ay ardaydu marin ugu heli karaan agabyada nidaamka maktabadda dadweynaha.

Ardaygaagu waxa si otomaatig ah loogu diwaangelin doonaa Kaarka Maktabada EXCEL ee Ardayga ee Maktabada Dadweynaha ee San Diego.

Kaarka EXCEL wuxuu u oggolaanayaa ardayda SDUSD inay...

- Ilaa 3 buug ama buugaag maqal ah ka amaahdaan goob kasta oo ka mid ah goobaha Maktabada Dadweynaha ee San Diego.
- Ilaa 5 ebook-ya ka amaahdaan eCollection-keena.
- Ma jiraan wax ganaaxyo ah oo la iskaga qaadayo agabyada la soo daahiyey, la lumiyeey ama la waxyeelleeyey.
- Helaan umeerinta shaqada dugsiga oo qof-ka-qof ah, onlayn ah bilaashna ah taas oo ku baxaysa Ingiriis ama Isbaanish ee dhammaan maadooyinka waaweyn.
- Isticmaalaan kombuyuutarrada maktabadda dadweynaha ee goob kasta oo ka mid ah goobaha maktabadaha.



Waalidiinta ayaa mas'uul ka ah isticmaalka agabyada maktabadda ee carruurtooda.

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo (FAQs)

Sidee ayuu ilmahaygu u isticmaalaa kaarka maktabadda? Waxay u baahan doonaan inay kaarkooda EXCEL iyo lambarka aqoonsiga ardaynimada geeyaan mid kasta oo ka mid ah 36-ka goobood ee maktabadaha dadweynaha si looga shaqeysiyo.

- Waxay u baahan doonaan inay ogaadaan PIN-kooda si ay marin ugu helaan agabyada internetka. PIN-kooda 4-ta god ah ayaa si otomaatig ah loogu qoondeeynayaa kaas oo ka kooban bisha iyo maalinta dhalashadooda (Tusaale ahaan: Meey 1-deeda waa 0501)

Waa maxay macluumaadka ardayga ee ay San Diego Unified School District la wadaagi doonto Maktabadda Dadweynaha ee San Diego? 1) Magaca Ardayga, 2) Dugsiga, 3) Lambarka Aqoonsiga Ardayga, 4) Taariikhda Dhalashada Ardayga. Maktabada Dadweynaha ee San Diego waxay saxiixday heshiis ah inaan macluumaadka ardayga lala wadaagin hay'adaha kale.

Maxaa dhacaya haddii aan rabo in ilmahayga uu si buuxda marin ugu helo adeegyada iyo agabyada Maktabadda Dadweynaha ee San Diego? Kaarka SDPL wuxuu si buuxda marin u siinaya ardayda ilaa 100 agabyo. Haddii aad jeclaan lahayd inaad hesho kaarka caadiga ah, oo marin buuxda bixinaya, waxaad sidaas samayn kartaa adigoo booqanaya goob ka mid ah goobaha SDPL.

Ka waran haddii ilmahaygu uu hore u haystay kaarka Maktabadda Dadweynaha ee San Diego? Haddii ilmahaagu uu hore u haystay kaarka SDPL, markaa ilmahaagu wuxuu yeelan doonaa laba kaar oo wuxuu isticmaali karaa labada kaarba haddii loo baahdo.

Maxaa dhacaya haddii aanan rabin in ilmahaygu ka qaybqaato Barnaamijka Kaarka Maktabadda ee EXCEL? Haddii aadan rabin in ilmahaagu yeesho akoonka maktabadda, sida fudud waa inaad ka shaqeysiin kaarka oo aad ku soo celiso macalinka ilmahaaga.

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu lumiyo kaarkiisa/kaarkeeda? Ilmahaagu waxa uu booqan karaa goob kasta oo ka mid ah goobaha maktabada SDPL isaga oo wata aqoonsiga ardaynimada # waxaana la siin doonaa kaar cusub lacag la'aan.

Halkeen ku celinayaa buugaagta aan ka soo qaato Maktabadda Dadweynaha ee San Diego? – Waxaa lagu celinayaa mid ka mid ah 36-ka goobood ee maktabadda. Muddada haysashada buugaagta waa 30 maalmood waana la cusboonaysiin karaa haddii isticmaale kale uusan ka soo codsan maktabadda. Muddada haysashada buugaagta ebooks-ka waa 21 maalmood waxaana si otomaatig ah loo soo celiyaa taariikhda la filayo.

Intee in le'eg ayaa ilmahaygu isticmaali karaa kaarka? Ardayda waxay isticmaali karaan kaarkooda ilaa ay ka gaarayaan 21 sano jir.

Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah, nagu soo booqo khadka www.sandiego.gov/excel

